

UU DIYAAGAROWGA DUGSIGA XANAANADA CARRUURTA



Jadwalka Hawlgelinta Qoyska

Soo dhawoow! Ma ogtahay in ilmahaagu diyaar u yahay inuu wax barto meel kasta iyo wakhti kasta? Waa xaqiiqo! Xataa ka hor intaysan bilaabin dugsiga, ilmahaagu wax buu bartaa maalin kasta. Mar kasta oo qoyskaagu wada hadlayaan ama wada ciyaarayaan, waxaad ka caawinaysaa ilmahaaga inuu koro. Waxaad tahay macalinkoodii ugu horeeyay uguna muhiimsan!

Waxa jira talooyin ku jira jadvalkan ee siyaabaha aad ilmahaaga uga caawin karto in uu wax barto inta lagu jiro sanadka. U adeegso hawlaha isku xiran siyaabo badan oo aad ku ciyaari karto oo aad wax uga baran karto guriga. Jadvalkan waxaa qayb ka ah midabyo kaa caawinaayo inaad ogaato hawlaha u fudud **3 ilaa 5 sano jirrada**. Qaarkood ayaa laga yaabaa inay aad ugu adag yihiin carruurta yaryar ayna yihiin kuwa uu fiican carruurta sanadka **ka horeeya dugsiga xanaanada**. Waxaa sidoo kale loo isticmaalaa in lagu muujiyo **habka kala guurka ee dugsiga xanaanada**. Dhawaan ilmahaagu waxa uu aadi doonaa dugsiga xanaanada. Tani waa wakhti xiiso leh! Qoyskaaga waxaa laga yaabaa inay qabaan su'aalo ku saabsan diiwaangelinta ama u diyaargarowga dugsiga xanaanada. Jadvalkan ayaa kaa caawin doona. Wuxuu leeyahay macluumaad ku saabsan sida ilmahaaga looga diiwaan geliyo dugsiga. Waxaa diirradadu la saarayaa [Dugsiyada Dadweynaha ee Degmada Jefferson](#) (JCPS) Si kastaba ha ahaatee, haddii aad ilmahaaga u xuleyso dugsi kale, waxaa laga yaabaa in nidaamku uu mid yahay

Waxaa laga yaabaa inaad maqashay dad ka hadlaya "Diyaarowga Dugsiga Xanaanada." Qoysaska qaar ayaa ka werwera inay carruurtoodu diyaar uu yihiin iney wax bartaan islamarkaana ay ku biiran dugsiga xanaanada. Taasi sax ma aha! Carruurta ayaa wax ku bartaa oo ku kora xawligooda. Shaqaalaha dugsiga ayaa baran doona ilmahaaga. Waxay baran doonaan waxay yaqaaniin iyo waxay diyaar u yihiin inay sameeyaan.

Dugsiyadu waxay la kulmi doonaan carruurta halka ay joogaan waxayna ka caawin doonaan inay guulaystaan.



Haddii qoyskaagu xulanayo JCPS ayna qabaan su'aalo, kala xiriir Xarunta Wicitaanka ee JCPS 502-313-HELP (4357). Xubnaha kooxda ayaa kugu xiri doonaa waaxda JCPS ama xubinta shaqaalaha ee ku haboon. Waxaad sidoo kale ku soo diri kartaa email ahaan jcps.help@jefferson.kyschools.us.

Ugu dambeyn, haddii qoyskaagu uu xiisaynayo doorashooyin dheeraad ah ee dugsiga xanaanada carruurta, [halkani](#) waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan barnaamijyada kale ee dugsiga xanaanada carruurta ee bulshada.

HAWLAHA LAGU TAAGEERAYO KU MEEL GAARKA EE WAQTI KASTA


3 ilaa 5 sano

- Tixgeli inaad iska diiwaangeliso metro United way's [da'da iyo marxaladaha su'aalaha](#). Waxaad iska qori kartaa barnaamijkan baarista bilaashka ah wakhti kasta inta u dhexeeya dhalashada iyo gelitaanka dugsiga xanaanada carruurta si aad wax badan uga barato awoodda ilmahaaga iyo si aad wax badan uga ogaato hawlaha ka caawin doona ilmahaaga inuu wax barto.
- La hadal ilmahaaga. Wada hadalka furan ee mar welibo wuxuu muhiim u yahay dhisidda maskaxda ilmahaaga. kula hadalka ilmahaaga luuqad kasta waxay ka caawisaa maskaxdooda inay samayso xiriirto muhiim ah. Isticmaal luqadaha adiga iyo ilmahaaga aan idin dhibeynin marka aad guriga joogtan. [Hadalka shan ilaa lix kelmadood sadarro ee hawsha qoyska](#).
- Qaad heesaha dugsiga xanaanada carruurta ama la hees carruurtaada: [U hees Heeso Fudud HawlahaQoyska](#).
- Wada fiiriya buugaagta. Uma baahnid in aad akhrido kelmado si aad wax ula akhrido ilmahaaga. Kala hadal waxa ay ku arkaan buugaagta. Weydii su'aalo ay ka mid yihiin "Maxay sameynayaan?" ama "Xagee joogaan?" U ogolow ilmahaagu inuu su'aalo ku waydiiyo, sidoo kale.
- Hubi inay gurigaaga yaalliin buugaag. Agabkan ayaa kaa caawin kara inaad wax la akhrido ilmahaaga oo aad heli karto buugaag.
 - Maktabadda Dadweynaha ee bilaashka ah ee Louis ville ayaa kafaala qaaday [1000 Buug Ka hor Tartanka Dugsiga Xanaanada Carruurta](#).
 - Qoysaska leh carruurta da'doodu u dhaxayso 0 ilaa 5 sano ee ku jira koodka boostada waxay iska qori karaan [Maktabada Mala-awaalka ah ee Louisville](#).
 - Intaa waxaa dheer, dhammaan qoysaska waxay booqan karaan [maktabadda dhijitaalka ah ee Akhristaha Koraaya ee Louisville](#) oo ay ku jiraan buugaagta Louisville ee gaarka ah.

HAWLAHA LAGU TAAGEERAYO KU MEEL GAARKA EE WAQTI KASTA

Habka Kala-guurka Dugsiga Xanaanada Carruurta

- Hubi inaad ogaato goorta uu ilmahaagu gaarayo da'da uu ku bilaabi karo dugsiga xanaanada carruurta. Kentucky, carruurta waa inay shan jirsadaan Ogosto 1-deeda si ay ugu biiraan sanad dugsiyeedkaas. Haddii carruurta buuxiyaan 5 sano inta u dhaxaysa Ogosto 2 iyo Oktoobar 1, qoysasku waxay codsan karaan [oggolaanshaha hore ee dugsiga xanaanada carruurta](#) iyo baaris inta u dhaxaysa Disembar 1 iyo Maarso 1. Carruurta waa inay bilaabaan dugsiga xanaanada carruurta marka ay gaaraan lix sano.
- Haddii qoyskaagu ku hadlo luqad aan ahayn Ingiriis, waxaad codsan kartaa turjumaan markaad la falgalayso shaqaalaha JCPS. Degmo dugsiyeedka waxa looga baahan yahay inay qoysaska siiso turjubaan si kor loogu qaado la xiriirka shaqaalaha dugsiga. JCPS waxay samaysay [kaararka hadalka](#) si ay uga taageeraan qoysaska iney codsadaan turjubaano.
- Haddii aad wax walaac ah ka qabto korriinka ilmahaaga, la hadal dhakhtarkaaga. Barnaamijyada jira ee bulshada sida [Tallaabooyinka Ugu horreeya](#) ama [Carruurnimada Hore ee JCPS](#) ee ku caawin kara. Intaa waxaa dheer, waxaad la xiriiri kartaa [JCPS Adeegga Waxbarashada Ilmaha Gaarka ah \(ECE\)](#) haddii aad aaminsantahay in ilmahaagu u baahan yahay taageerada dheeraadka ah ee dugsiga xanaanada carruurta.
- Sahami JCPS [agabka Ready4k. Liiska hubinta ee JCPS](#) waa agab kale oo ay qoysasku dib u eegi karaan si ay u fahmaan sida dhamaan caruurta diyaar ugu yihiin inay koraan oo ay wax ku bartaan dugsiga xanaanada carruurta.





Jadwalkan ayaa ku hagi doona habka aad u dooranayso dugsi iyo u diwaan galinta ubadkaaga dugsiga xanaanada carruurta. Waxa kale oo ay leedahay hawlo ka caawinaya ubadkaga korriinka iyo waxbarashada.

SEBTEMBAR

11 BILOOD 'ILAA
DUGSIGA XANAANADA
CARRUURTA



3 ilaa 5 sano

- Waxyaabaha sida joogtada ah loo sameeyo waa muhiim! Samee waxyaabaha joogtada ah wakhtiyada cuntada, wakhtiga qubeyska, ama wakhtiga jiifka Waxay ka caawisaa ilmahaaga inuu dareemo badbaado iyo madax banaani markay ogaadaan waxa soo socda: [Xeerarka Fudud iyo Waxqabadyada Joogtada ah ee Qoyska](#).

Habka Ku meel gaarka ah ee Dugsiyada Xanaanada Carruurta

- Bilow inaad sahamiso dookhyada qoyskaaga ee dugsiya xanaanada carruurta. [Mareegta Radinta Dugsiya JCPS](#) waa meel fiican oo laga bilaabo. JCPS waxa kale oo ay bixisaa [hagaha Doorashada Dugsiya](#) ee luqadaha Isbaanishka, Carabiga, Sawaaxiliga, Nepali, iyo Soomaaliga. Qoysasku sidoo kale waxay booqan karaan shabakadaha dugsiya waxeyna sidoo kale la hadli karaan asxaabta iyo kuwa la shaqeeya.
- Dugsi nooc ah ayaa ku habboon ilmahaaga iyo qoyskaaga? [Tilmaamaha Doorashada Dugsiya Hoose](#) waxay sharxayaan kooxaha dugsiya, dugsiyada dadweynaha ee leh koorsooyinka gaarka ah, iyo barnaamijyada gaarka ah ee JCPS. U hel dugsiya ugu fiican ilmahaaga. Qoyskaagu waxa kale oo laga yaabaa inay sahamiyaan dugsi kale.
- Daawo dhacdooyinka gaarka ah ee bulshada dhexdeeda! [Xafiiska JCPS ee Doorashada Dugsiya](#) wuxuu leeyahay xubno kooxeed munaasabadaha si ay kaga taageeraan qoysaska doorashada dugsiya, diiwaangelinta, iyo codsiya. (Diiwaangelintu waa samaynta akoon online ah ee JCPS oo muujinaysa caddaynta ciwaanka. Arjigu waa codsiya doorashadaada dugsiya.)



OKTOOBAR

10 BILOOD 'ILAA DUGSIGA
XANAANADA CARRUURTA



3 ilaa 5 sano

- Xisaab oo kala hadal nambarada ilmahaaga. Waxaad isticmaali kartaa farahaaga si aad u tiriso. Cunugaagu ha ku celceliyo tirinta alaabta marka aad socod aado ama aad booqato dukaan: [U tiri qaab isku xigxiga ilaa 30 Hawlaha Qoyska](#).

Habka Ku meel gaarka ah ee Dugsiyada Xanaanada Carruurta

- Ka qaybgal [Bandhigga Dugsiyada ee JCPS](#). Waxaad la hadli kartaa shaqaalaha dugsi kasta oo hoose oo waxaad wax badan ka baran kartaa doorashooyinka dugsiyada ee qoyskaaga heli karo. Waxa kale oo aad
- ka baran kartaa hababka diiwaangelinta iyo codsiga JCPS. Turjubaano ayaa diyaar noqon doona si ay qoyskaaga uga caawiyaan inay ku wada xiriiraan luqadda aad doorbidayso.
- Haddii qoyskaagu dooranayo JCPS, [ka diwaangeli ilmahaaga](#) dugsiyada xanaanada carruurta qaab online ah. Xitaa haddii aad leedahay carruur kale oo dhigta JCPS, waa inaad ka diwaan gelisaa ilmahaaga 5 jirka ah dugsiyada xanaanada carruurta. Diiwaangelintu waxay u baahan tahay laba tallaabo:
 - Buuxi foomka online-ka ah. Waxaad u baahan tahay magacaaga iyo kan ilmahaaga, taariikhda dhalashada, jinsiga, lambarka taleefanka, iyo ciwaanka iimaylka.
 - Soo gudbi caddaynta ciwaanka: LGE ama biilka biyaha, warqada mushaharka, heshiis ijaareedka ama warqadda saxeezan, ama waraaqaha wakaalada dowladda. Haddii qoyskaagu aanu lahayn ciwaan go'an, waxaad kala xiriiri kartaa Xafiiska Helitaanka iyo Fursada 502-485-3650. Waxaa laga yaabaa inay ku caawiyaan.
- Haddii aad u baahan tahay caawimo, waxaad [ballan diiwangelin ah aad ka qabsan kartaa](#) JCPS. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjumaan. Xusuusnow, diiwaangelintu waa samaynta akoon online oo JCPS ah iyo muujinta caddaynta ciwaanka.



readyforkalliance.com




familieslearning.org



Noofeembar

9 BILOOD 'ILAA
DUGSIGA XANAANADA
CARRUURTA



Sannad Kahor Dugsiga Xanaanada Carruurta

- Kala hadal ilmahaaga erayada iyo xarfaha ay ku arkaan hareerahooda. Ku bilow xarfaha magaca ilmahaaga. Kadibna ku sii dar xarfo cusub dhowr mar. Ka hadalka xarfaha iyo erayada waxay ka caawisaa carruurta inay bartaan in calaamadahani ay wataan farriimo: [Waxey adeegsataa Qorista iyo Sawir-qaadista si ay uu muujiso Fikradaha Hawlaha Qoyska.](#)

Habka Ku meel gaarka ah ee Dugsiyada Xanaanada Carruurta

- Dugsiyada badankoodu waxay leeyihiin guryo furan ama waxay bixiyaan dalxiisyo. Waxaad arki kartaa dugsiga waadna la kulmi kartaa shaqaalaha. Tani waa hab fiican oo aad wax badan uga baran karto doorashadaada dugsiga. Wac dugsiga si aad u waydiiso guryaha furan iyo tamashlaha. JCPS waxay haysaa [liiska dhacdooyinka](#) qoysaska danaynaya dugsiyadooda. Qoysasku waxay codsan karaan tarjumaan dhacdooyinka JCPS.
- Haddii aad dooranayso JCPS, qoyskaagu wuxuu codsan karaa Noofeembar. Codsigu waa marka aad ilmahaaga u doorato dugsiga ugu wanaagsan. Hubi inaad tan samayso Diseembar, si ilmahaagu u helo fursadda ugu fiican ee uu ku dhigto dugsiyada ku habboon.



Diseembar

8 BILOOD 'ILAA
DUGSIGA XANAANADA
CARRUURTA



3 ilaa 5 sano

- Ilmahaagu wuxuu ku saxeexi karaa magacooda kaararka ama hadiyadaha. Ka caawi inay ku celceliyaan qorista magacooda. Waxaad tusi kartaa ilmahaaga sida loo qabsado qalinka marka uu wax qorayo: [Akhrinaaya ama Qoraaya Magaca u gaarka ah hawlaha goyska](#).
- Sii ilmahaaga fursad uu wax ku sawiro! Waxay abuuri karaan farshaxan. Sawirradoodu waxa ay u ekaan karaan qoraallo, laakiin wax bay ula jeedaan ilmahaaga. Weydii cunugaada in uu wax kaaga sheego sawirradooda: [Waxa ay Adeegsadaan Sawirro si ay uga Sheekeeyaan Waxqabadka Qoyska](#)

Habka Ku meel gaarka ah ee Dugsiyada Xanaanada Carruurta

- Kama dambays codsiga [JCPS](#) waa Diseembar. Hubi in qoyskaagu uu codsaday dugsiya ugu habboon ee ilmahaagu u baahan yahay!



readyforkalliance.com



National Center for
Families Learning

familieslearning.org



JANAAYO

7 BILOOD 'ILAA
DUGSIGA XANAANADA
CARRUURTA



3 ilaa 5 sano

- Xilliga jiilaalka macnihiisu waa jaakadaha iyo koofiyadaha! Ka caawi ilmahaaga inuu barto sida loo labbisto. Waxa laga yaabaa inay qaadato wakhti yara dheer, laakiin waxay ku dhiirigelisaa inay madax banaanaadaan. Ogaanshaha sida loo xirto badhanka, sib-ka iyo xirashada dharka ayaa ah xirfado waxtar u leh noloshu: [Xiritaanka iyo iska siibida dharka ee hawsha goyska](#).
- Kala hadal ilmahaaga midabada iyo qaababka. Waxaad ka heli kartaa midabyo iyo qaabab halka aad ku nooshahay, dukaanka dhexdiisa ama markaad dibadda socoto. Isku day inaad ilmahaaga la ciyaarto ciyaar ah "i basaas": Indhahayga yar waxaan ku basaasayaa. Waxa kale oo aad waydiin kartaa ilmahaaga iney soo saaraan saddex shay oo isku midab ah: [Aqoonsi, Magacyo, iyo Nuqullo Qaababka Aasaasiga ah ee Hawlaha Qoyska](#).



readyforkalliance.com



familieslearning.org


FEBRAAYO

6 BILOOD 'ILAA
DUGSIGA XANAANADA
CARRUURTA



3 ilaa 5 sano

- Uu isticmaal ilmahaaga erayo dareen ah sida farxad, murugo, waali, cabsi, iyo farxad. Carruurta waxay u baahan yihiin erayo ay kaga hadlaan sida ay dareemayaan. Waxa kale oo aad isticmaali kartaa ereyo dareen ah naftaada marka aad la joogto ilmahaaga. Waxaa laga yaabaa inaad ku faraxsan tahay ama aad ka murugeysan tahay inaad aado meel marka roobku da'o: [Wuxuu muujiyaa Baahiyaha Isaga u gaarka ah oo wuxuu Rabaa Hawl Qoys](#).
- La booqo maktabadda ilmahaaga. Waa hab wanaagsan oo wax lagu barto xilliga jiilaalka marka uu qabow jiro. Wakhtiga sheekada iyo hawlaha kale ee maktabaddu waa meel fiican oo lagula kulmo lagulana hadlo carruurta iyo qoysaska kale, sidoo kale! Dhammaan qoysaska waxay ku raaxaysan karaan barnaamijka maktabadda. Qoyskaagu waxa laga yaabaa inay maktabadda kaar ka helaan [Maktabadda Dadweynaha ee Bilaashka ah ee Louisville](#).
- Kala hadal ilmahaaga dhawaaqyada. Dhageyso wax walba: muusiga, codadka shimbiraha ama cayayaanka, sacabka, iyo xitaa qosolka. Ka caawi cunugaada inuu dhageysto oo ka hadlo sida dhawaaqyada ay yihiin oo ay u kala duwan yihiin.



MAARSO

5 BILOOD 'ILAA
DUGSIGA XANAANADA
CARRUURTA



3 ilaa 5 sano

- Banaanka u bax si aad u boodboodaan, ula boodaan ilmahaaga. Safarrada garoonka ciyaartu waa madadaalo, cunugaadana wuxuu kori karaa jaranjarooyinka wuxuuna ku ciyaari karaa alwaax dheeli tiran. Dhaqdhaqaaqyadani waxay dhisaan murqaha iyaga oo hagaajinaya isuduwidda iyo dheelitirka: [Orod, Bood, oo fuul Hawlaha Qoyska](#).

Habka Ku meel gaarka ah ee Dugsiyada Xanaanada Carruurta

- Carruurta waxay u baahan yihiin in la [tallaallo, baaritaanno jireed](#), baaritaanno ilkeed, iyo baaritaanno indho marka ay bilaabayaan dugsiya xanaanada carruurta. Gu'ga waa wakhti aad u fiican oo balamo lala samaysto dhakhaatiirta iyo dhakhtarka ilkaha. Waxaad booqan kartaa [Xarumaha Caafimaadka Qoyska](#) adeeg bixiyayaasha, adeegyada, iyo macluumaadka luuqada aad doorbidayso.
- Haddii qoyskaagu ku hadlo luqado dheeraad ah markaad guriga joogtan, ilmahaagu waxa laga yaabaa inuu ka helo adeegyada Barayaasha Ingiriisiga JCPS. Waxaad codsan kartaa baaris ilaa lix bilood ka hor intaysan bilaabin dugsiya xanaanada carruurta. La xiriir qaybta [Ingiriisiga sidii Luuqad Labaad](#) (ESL) si aad taageero u hesho.



ABRIIL

4 BILOOD 'ILAA
DUGSIGA XANAANADA
CARRUURTA



3 ilaa 5 sano

- Ku dhiiri geli ilmahaaga inuu si madaxbanaan wax u cuno. Ha ku tababartaan isticmaalka fargeeto ama qaaddo. Qoysasku waxay sidoo kale bari karaan carruurtooda inay furaan baakadaha. Shaqadan waxay ka caawin doontaa ilmahaaga gacmihiisu inay xoogaystaan si ay u sameeyaan waxyaabo badan oo ay iskood u qabtaan: [Waxay is Quudinayaan iyagoo Istimaalaya Maacuunta Hawlaha Qoyska.](#)

Habka Ku meel gaarka ah ee Dugsiyada Xanaanada Carruurta

- Haddii aad codsatay JCPS, tani waa bisha aad baran doonto meelaynta qoyskaaga! La soco baraha bulshada uu ku leeyahay dugsiyada si aad u bilowdo inaad la xiriirto bulshada dugsiyada.
- Dugsiyada badan ayaa xilliga gu'ga martigeliyaa hawlaha qoyska waxayna soo dhawaynayaan qoysaskooda cusub ee dugsiyada xanaanada carruurta. Ka eeg mareegta dugsiyada dhacdooyinka iyo taariikhaha. Wakhtiga badan ee ilmahaagu iyo qoyskaagu ku qaadan karaan dugsiyada cusub waxey ku xiran tahay sida ay dareeman.



MAY

3 BILOOD 'ILAA
DUGSIGA XANAANADA
CARRUURTA



Sannad Kahor Dugsiga Xanaanada Carruurta

- Ku celceli ka jawaabista su'aalaha sida, "Xagee ku nooshahay?" iyo "Waa maxay lambarka taleefoonkaagu?" Ilmahaagu waxa uu u baahan yahay in uu ogaado macluumaadkan haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah: [Waxa uu Yaqaanaa Macluumaadka Shakhsiyeed Hawlaha Qoyska](#).
- Eeg buugaagta ku saabsan dugsiga. Waxaad ka hadli kartaa sida jilayaasha ay saaxiibo u samaysanayaan oo ay wax uga baranaayan dugsiga: [La Ciyaaraayan Carruurta Kale Iana Wadaagayaan Hawlaha Qoyska](#).


Habka Ku meel gaarka ah ee Dugsiyada Xanaanada Carruurta

- Eeg haddii ilmahaagu u qalmo isku imaatinka JCPS ee Ready4K- isku imaatinka xagaaga si looga caawiyo in carruurta lagu soo dhaweeyo dugsiga xanaanada carruurta. Diiwaangelintu waxay caadi ahaan dhacdaa horraanta May. Barnaamijkan si degdeg ah ayuu u buuxsamaa ee goor hore is qor.
- Uu fiirso macluumaadka dugsigaaga ee ku saabsan dhacdooyinka soo dhaweynta inta lagu jiro xagaaga iyo horraanta dayrta. Dugsiyo badan ayaa boosto ama iimayl u soo diri doona qoyskaaga.



XAGAAGA

2 BILOOD 'ILAA
DUGSIGA XANAANADA
CARRUURTA



3 ilaa 5 sano

- Ururo badan oo bulsho ayaa bixiyaa barnaamijyada xagaaga ee qoysaska. Iska qor Barnaamijka Akhriska Xagaaga ee maktabadda ama [Kaarka Dhaqanka Louisville](#).

Habka Ku meel gaarka ah ee Dugsiyada Xanaanada Carruurta

- Ilmahaagu waxa uu u baahan doonaa agabka dib-loogu-noqdo dugsiyada sida boorsada dhabarka iyo dharka. Ogow waxa ilmahaagu dugsiyada uu ugu baahan yahay. Ka raadi liiska mareegaha dugsiyada. Qorshee si aad wax badan ugu diyaariso intii suurtoagal ah. Jaaliyado badan oo shuraako ah ayaa martigeliya sahay-siinta.
- Haddii qoyskaagu u baahan yahay caawimo, la xiriir [isku-duwaha Xarunta Khayraadka Qoyska \(FRC\)](#) ee dugsiyada. FRC waxay ka caawin kartaa qoyskaaga inay helaan Barnaamijka Kaalmada Dharka ee JCPS (CAP) oo ku siin kara lebbis bilaash ah iyo dhar kale. Waxay sidoo kale kaa caawin karaan saadka iyo ballanta baaritaanka caafimaadka.
- Soco, fuul, ama u kaxee dugsiyada ilmahaaga haddii ay suurtoagal tahay xagaagan. U tilmaam dhismaha ilmahaaga oo kala hadal inta ay ka baran doonaan dugsiyada. Tani waxay ilmahaaga ka caawinaysaa inuu ogaado in dugsiyada yahay meel ammaan ah oo waxbarasho ay ka dhacdo.



readyforkalliance.com



familieslearning.org

OGOSTO

DUGSIGA XANAANADA
CARRUURTA WAA KAN!



Sannad Kahor Dugsiga Xanaanada Carruurta

- Laba toddobaad ka hor inta aanu dugsiyo bilaaban, kala hadal ilmahaaga maalinta ugu horreysa ee dugsiyo. Ka caawi inay dejiyaan qorshe hawleedyo ay ka mid yihiin inay dharka dhigtaan habeen ka hor iyo iney diyaarsadaan boorsada dhabarka: [Waxay Hayaan Raad-raaca Alaabta Shakhsi ahaaneed ee Hawlaha Qoyska](#).
- Kala hadal ilmahaagu sida uu u tagi doono dugsiyo. Ma uu lugeyn doonaan? [Bas mey raaci doonaan?](#) Mise waxaa wadi doonaa saaxiib ama xubin qoys? Arag si [Sahal ah kala Soocida Waalidka iyo Hawlaha Qoyska](#).

Habka Ku meel gaarka ah ee Dugsiyada Xanaanada Carruurta

- Isku day inaad ka qaybgasho munaasabadaha sida isku imaatinka dugsiyo xanaanada carruurta, guriga furan, oo la kulan macalinka u ogolaanaya qoyskaaga inay soo booqdaan dugsiyo. Marka ilmahaagu uu barto dugsigooda, waxay dareemi doonaan badbaado badan iyo inay aad ugu farxan inay bilaabaan dugsiyo xanaanada carruurta.
- Qoyskaagu waxa laga yaabaa inay u qalmaan cunto bilaash ah ama in laga dhimo kharashka cuntada dugsiyo. [Soo ogow haddii dugsiyoaga siiyo cunto bilaash ah dhammaan ardayda ama haddii aad uu baahan tahay inaad buuxiso foom](#). Haddii aad su'aalo qabto, shaqaalaha xafiiska ilmahaaga ayaa ku caawin doona.



readyforkalliance.com



familieslearning.org

SEBTEEMBAR

DUGSIGA XANAANADA
CARRUURTA WAA KAN!



Sannad Kahor Dugsiga Xanaanada Carruurta

- Bisha koowaad ee dugsiga xanaanada carruurta waxa laga yaabaa inay noqoto mid madadaalo iyo xiiso leh. U dabaaldag ilmahaaga marka ay sameeyaan ama bartaan waxyaabo cusub. Ha werwerin haddii ilmahaagu ku qaadato dhowr toddobaad si uu hurdada uga soo kaco, ugu diyaargarooobo dugsiga ama uu aado dugsiga. Waxaad ku caawin kartaa inaad dejiso hab nololeed, in uu helo hurdo badan iyo in uu waqti ku qaato wax akhris ama ciyaar.
- Bilowga dugsigu ilmo kasta wey ku kala duwan yihiin. Ilmahaagu waxa laga yaabaa inuu dugsiga jeclaado bilawgii ama waxa laga yaabaa inay wakhti ku qaadato inuu la qabsado cadooyinka cusub. Mid ka mid ah waxyaabaha muhiimka ah ee aad samayn kartaan qoys ahaan ayaa ah inaad isku xirtan macalinka ubadkaaga goor hore iyo inta badan. Baro sida ugu wanaagsan ee loola hadlo macalinka ilmahaaga taas oo ku saabsan su'aalaha laga yaabo inaad qabto ama macluumaadka aad rabto inaad la wadaagto ilmahaaga.



readyforkalliance.com

CREATED BY
ncfi

National Center for
Families Learning

familieslearning.org